

Ma u baahantahay caawimaad iyo taageero?

- Waxaa igu dhacay Gudniinka Haweenka iyo Gadhahaa yar yar ah waxaan jeclaan lahaa inaan ogaado sida aad ii taageeri karto
- Xanuun badan ayaa i haya xilliga caadada
- Waxaan leeyahay uur waxaana jeclaan in si caadi ah u dhalo
- Waxaan leeyahay uur oo waxaan rabaa inaan ogaado warbixin ku saabsan dhalist ilamaha
- Waxaan qabaa su'aalo ku saabsan Galmada
- Ma rabo in gabadhayda la gudo
- Waxaan ka walwalsanahay in walaashay/gabadhayda/saaxiibtay la gudo

Waxaan sidoo kale ka caawineynaa mowduucyo kale sida:

- Dhibaatooyinka qoyska ama guurka
- Arrimaha caafimaadka guud ahaan
- Dhibaatooyinka la xidhiidha nafta iyo qalbiga
- Dhibaantoyinka haweenka gaara sida jir dilka

Waxaad naga heli kartaa caawimaad – Adiga ayaan kuu heegan nahay!

Naga soo wac taleefanka macluumaadka: +43 1 267 7 267

Ama E-mail ahaan: info@fgm-koordinationsstelle.at

Macluumaad dheeraad ah halkan: <https://fgm-koordinationsstelle.at>



XARUMAHA TALO-BIXINTA GOBOLEED

VIENNA Xarunta Cafimaadka Haweenka ee FEM Süd
Wiener Gesundheitsverbund – Klinik Favoriten, Kundratstraße 3, 1100 Wien
+43 1 60191 5201 kfn.femsued@gesundheitsverbund.at

VIENNA Xarunta Cafimaadka Raga –MEN
Wiener Gesundheitsverbund – Klinik Favoriten, Kundratstraße 3, 1100 Wien
+43 1 60191 5454 kfn.men@gesundheitsverbund.at

GOBOLKA STEIERMARK Laanqerta Cas ee Osteriya, Landesverband Steiermark
Merangasse 26, 8010 Graz (Eingang Leonhardstraße 23)
+43 50 1445 10176 womencare@st.rotekreuz.at

GOBOLKA TIROL Laanqeyrta Cas ee Osteriya, Landesverband Tirol
Heiliggeiststraße 19, 6020 Innsbruck
+43 664 6046630419 fgmc-koordinationsstelle@rotekreuz-tirol.at

GOBOLKA SALZBURG Xarunta Cafimaadka Haweenka ee Salzburg
Mag.^a Aline Halhuber-Ahlmann, Alpenstrasse 48/1, 5020 Salzburg
+43 662 442255 a.halhuber@fgz-salzburg.at

GOBOLKA OBERÖSTERREICH Xarunta Cafimaadka Haweenka ee Linz
Mag.^a Friederike Widholm, Kaplanhofstraße 1, 4020 Linz
+43 664 5648304 office@fgz-linz.at



Dieses Projekt wird durch das Bundeskanzleramt (Kofinanziert)

MAYA GUDNIINKA DUMARKA

FGM/C, Female Genital Mutilation/
Cutting, Tahur, Khitan, Bondo, Sunna,
Exzision, Cut, Gudniin, Halalays,
Megrez, Gudniinka fircooniga ah



FGMC 
Koordinationsstelle
Kompetenzzentrum Österreich

WAA MAXAY GUDNIINKA GABDHAAHA?

Guudniinka magacyo kala duwan buu leeyahay. Magaca guud-ahaan loo yaqaano waa FGM/C- isla markaasna waxaa la gooya Xubinta taranka gabdhaha yar yar ama haweenka, Kintirka inta ugu horeeysa oo la gooyaa iyo bishamaha yaryar ee ku hareeraysan iyo bishamaha waa weyn ee kintirka ku hareeraysan. Gabdhaha waxaa inta badan la guda ka hor inta aysan qaana gaarin, da'da afar ilaa saddex iyo toban jir. In ka badan 200 milyan oo Haween ah iyo gabdho yar yar ayuu sameeya adduunka oo dhan.

WAA MAXAY CAQABADAHAA UU KEENO KARO CAAFIMAAD AHAAN?

Gudniinku waxa uu wax u dhimaa caafimaadka gabadha yar yar, waxa uuna sababaa in ay dhib iyo silac ku kujirto inta ay nooshahay gabdhu gudniinka la nooshahay . Iyadoo ku xiran dhibaataada uu gudniinku keeno, caqabadaha ka dhalan karta waxay u dhexeysaa cabashooyin jireed iyo maskaxeed ilaa dhibaatooyin caafimaad oo aad u daran.



- Caabuqa kaadi mareenka iyo kadida oo xanuun badan
- Xanuun xilliga caadada
- Walaac, niyad-jab ama argagax
- Caabuq joogto ah iyo xanuunka dhabarka iyo qeybaha hoose ee caloosha
- Xanuun xilliga galmada iyo rabitaan la'aanta galmada
- Xaaladda ugu xun nee dhicikarta waa xiliga hooyada dhalayso, taas oo sababi kartaa inay
- xitaa dhimato!



Gudniinka gabadha yar yar iyo haweenka wuxuu ku xad-gudbaa xuquuqul insaanka

Gudniinka badanaa waa caado ama dhaqan ama diin darteen in loo sameeyo. Si kastaba ha ahaatee, gudniinka gandhaha yar yar ma aha mid diintu farayso. Waa xadgudub ka haweenka iyo gabdhaha waana mamnuuc gudaha Austria! Qofka gudniinka sameeya waa la ciqaabayaa, xataa hadday haweenaydu ogolaato iyadu inay is gudo. Waalidiinta sidoo kale waa la ciqaabi doona haddii ay gabadhooda u diraan Wadan kale si loo soo gudo.

Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah inay carruurtooda ka ilaaliyaan waxyeellada caafimaadkooda khatarta ku ah. Gudniinka gabdhaha yar yar aad buu u dhaawacaa jidhka iyo nafta ilmaha. wixi gabadha la ga gooyay dib loo ma soo celin karo lakiin, dhibaatooyinkii jirka iyo qalbigaba waa la daaweyn karaa.

Haweenka iyo gabdhaha yar yar ee la guday waxay xaq u leeyihiin taageero buuxda!

IMPRESSUM: Österreichisches Rotes Kreuz, Wiedner Hauptstraße 32, 1041 Wien, ZVR-Zahl: 432857691, Institut für Frauen- und Männergesundheit, Kundratstraße 3, 1100 Wien, ZVR-Zahl: 650474385, Mail: info@fgm-koordinationsstelle.at, Redaktion: Kerstin Bohner, Elisabeth Hanusch-Mild, Illustrationen: Lisa Vietze, Layout: Yvonne Nicko, Auflage Dezember 2023